



Guddiga koroonaha

Guddiga waxaa lagu magacaabay shirkii golaha wasiirrada ee 24-kii abriil 2020

WAR-SAXAAFADDEED

14-ka abriil 2021

NOU 2021:6 Maarayntii dawladda ee cudurka safmarka ah ee koroonaha

Guud ahaan si wanaagsan ayaa loo maareeyay, laakiin dulduleello ayaa iyagana jira

Hal sano kaddib markii uu cudurka safmarka ah billowday, Norway waxay ku jirtaa dalalka Yurub ee geeridu ay ugu yar tahay – iyo kuwa uu dhaawaca dhaqaale ee ugu yar soo gaaray. Ayada oo uu dalku ku jiro xaalad adag ayay mas'uuliyiintu ku guuleysteen in ay xaaladda degdeg ula qabsadaan ayaga oo qaatay go'aammo muhiim u ahaa saamaynta dhibaataada. Laakiin mas'uuliyiintu guul ma gaari lahayn haddii aan dadweynuhu taageeri lahayn tillaabooyinka ka hortagga faafidda cudurka.

- *Guddigu wuxuu qabaa in ay mas'uuliyiintu guud ahaan si wanaagsan u maareeyeen safmarka, laakiin wuxuu dhinaca kale baaritaanku daboolka ka qaaday dulduleello, weliba xagga heeganka, ayuu yiri madaxa Guddiga koroonaha, Stener Kvinnsland.*

Sax ayay ahayd in dalka la xiro 12-kii maarso 2020, laakiin wakhtiga ayaa sabab la'aan la isugu ciriirshay

Bishii maarso ee sanadkii hore markii la soo rogay tillaabooyinkii adkaa ee culayska ku ahaa noloshada dadka, wax badan lagama ogayn waxtarka ay yeelan doonaan tillaabooyinka ka hortagga cudurka. Hubid la'aan badan ayaana ka jirtay ilaa inta cudurku faafay. Wuxuu guddigu aaminsan yahay in lagu saxnaa in go'aan la gaaro meeshii la sii sugi lahaa in wax intaas ka badan cudurka laga sii ogaado.

Tillaabooyinka la soo rogay ma ahayn kuwo si wanaagsan loogu kuurgalay, si wanaagsanna looma diyaarin. Waxaa lagu jirey xaalad ay adag tahay in la ogaado meesha wax marayaan, laakiin wakhtiga ayaa sabab la'aan la isugu ciriirshay.

- *Bishii febraayo bartamahaheedii ayuu Agaasinka caafimaadku sheegay in laga yaabo in la soo rogo tillaabooyin adag. Laakiin haddana wasaaradihii kale midkoodna hawsha lagama qayb gelin. Ma aragno wax muujinaya in ka hor intaan dalka la xirin in la qiimeeyay waxyeellada-bulsho ee ay tillaabooyinku keenayaan, ayuu yiri Kvinnsland.*

Xiritaankii 12-kii maarso 2020 waxaa keenay cadaadis ka yimid ra'iisalwasaaraha iyo wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka. FHI way ka walaacsanaayeen, kumana talin tillaabooyin sidaan u adag.

Agaasinka caafimaadka ayaa gaaray go'aankii rasmiga ahaa ee 12-kii maarso.

Guddigu wuxuu qabaa in ay ahayd in dawladdu go'aankaas gaarto.

Dawladdu ma lahayn qorshe looga hortagayo cudurka dibedda ka imaanayay dayrtii 2020

Waxay tani si gaar ah u khuseysaa maarayntii faafiddii cudurka markii qodobbada laga dhaafay shaqaalaha ka soo safrayay Yurub.

- *Dawladdu xeeray ayay u samaysay dadka safarka shaqada ku imaanayay, laakiin may samayn nidaam fiican oo lagula socdo in xeerarka loo hoggaansamay, ayuu yiri sier Kvinnsland. Nidaamka ahaa shaqaalaha safarka ku yimid in ay is baari karaan beddelka meeshii ay karantiil geli lahaayeen, wuxuu ku salaysnaa in shaqa-bixiyayaashu isku dubaridaan, fuliyaan oo bixiyaan kharashka baaritaanka. Waxaa kale oo shaqa-bixiyayaasha mas'uul looga dhigay tillaabooyinka ka hortagga faafidda cudurka iyo in meelaha ay shaqaaluhu degayaan yihiin kuwo buuxiya shuruudihii karantiilka. Degmooyin shaqadu ku badatay ayaa mas'uul ka ahaa ilaalinta in shuruudihii la raacay.*

Dabayaaqadii 2020-kii markii ay dawladdu adkaysay koontaroolka xudduudaha, ma jirin nidaam hawshaas lagu fuliyo. Billowgii qalin iyo warqad ayaa lagu diiwaangelinayay dadka xudduudda ka soo gudba.

Ma caddayn kaalinta ay lahaayeen hay'adaha kala duwan

- *Sida ay mas'uuliyadda u kala leeyihiin Wasaaradda caafimaadka- iyo daryeelka, Agaasinka caafimaadka iyo FHI ayaa u muuqday mid aan kala caddayn intii lagu jirey maaraynta safmarka, ayuu yiri Kvinnsland.*

Wasaaradda caafimaadka- iyo daryeelka ayaa Agaasinka caafimaadka mas'uul uga dhigtay isu duwidda hawlaha laamaha caafimaadka, laakiin haddana wasaaradda laftigeedii ayaa isu duwiddii qabanaysay. FHI waa ay ka gudubtay kaalinteedii ahayd aqoon-soo-gudbinta. Agaasinka caafimaadka looma diyaarin buuxinta kaalintii mas'uuliyiinta caafimaadka looga baahnaa ee hawlaha ka hortagga faafidda cudurka. 11-kii diseembar 2020 ayay wasaaraddu markii ugu horreysay kala saartay sida kaalimaha loo kala leeyahay. In kasta oo aysan kaalimahoodu kala caddayn, haddana saddexdaas hay'adood si wanaagsan ayay u wada shaqeeyeen.

Dawladdu tixgelin badan ma siinnin degmooyinka. Hawlo aad uga badan intii ay filii kareen ayaa degmooyinka safmarka uga soo aaday.

Dawladdu diyaar ma ahayn

- *Dawladdu way ogayd in cudur safmar ah ahaa dhibaato heer qaran ah oo dalka ka dhacda tan ugu dhow in ay timaaddo, taas oo geysan doonta waxyeellada ugu badan. Waa dayacaad weyn in aysan diyaar ahayn markii uu cudurka safmarka ah ee covid-19 dillaacay, ayuu yiri Kvinnsland.*

In kasta oo uu xeerka ka hortagga faafidda cudurrada oggolaanayo in la xiro qaybo badan oo bulshada ah, haddana dawladdu diyaar uma ahayn in ay tillaabooyinka caynkaas ah adeegsato: Ma hayno tilmaamo, qorshayaal ama tababarro lagu sameeyay tillaabooyinkan.

Billowgii safmarka waxaa aad u yaraaday qalabka ka hortagga cudurrada.

- *Dawladdu way ogeyd in haddii cudur safmar ah dillaaco in ay aad ugu badan tahay in ay adkaan doonto sidii lagu heli lahaa qalabka ka hortagga cudurrada. Laakiin bakhaarradu way marnaayeen markii uu covid-19 Norway soo gaaray, ayuu yiri Kvinnsland. Dib-u-eegistii cudurkii safmarka ahaa ee sars ee 2003-dii iyo eboolihii dillaacay 2015-kii labaduba waxay caddeeyeen in uu adduunka ku yaraan karo qalabka ka hortagga cudurrada. Laakiin qorshaha keliya oo dawladda u yaallay wuxuu ahaa in qalab sidii caadiga ahayd looga soo iibsado suuqyada adduunka. Haddii uu cudurku isku mar ka dillaaci lahaa Shiinaha iyo dunida inteeda kale, xaaladdu aad ayay u adkaan*

lahayd.

Qoraal ballaaran

- *Qoraalka waxaan ku soo gudbinnay 17 fariimo-guud ah iyo 60 qodob oo waxyaalo laga baran karo ah iyo talooyin, ayuu yiri Kvinnsland. Waxyaalihii uu guddigu ogaaday, qiimayntiisii, waxyaalaha laga baran karo iyo talooyinka waxaa si kooban loogu soo qaatay billowga cutubyada qoraalka. Wuxuu guddigu soo qaatay 14 baaritaan oo meelo kale lagu sameeyay kuwaas oo hab dhigitaal ah loo daabacay.*

Guddiga

Guddiga koroonaha waxaa 24-kii abriil 2020 lagu magacaabay go'aan ka soo baxay golaha wasiirrada si loo eego, aqoonna looga kororsado covid-19 kii Norway ka dillaacay. Guddiga waxaa hoggaaminayay barafasoor Stener Kvinnsland.

Xubnaha kale:

Astri Aas-Hansen
Geir Sverre Braut
Knut Eirik Dybdal
Tone Fløtten
Rune Jakobsen
Toril Johansson
Christine Korme
Nina Langeland
Egil Matsen
Per Arne Olsen
Pål Terje Rørby

Qoraalka waxaa loo daabacay hab eleqtaroonig ah:

www.koronakommisjonen.no

www.regjeringen.no

Qoraalka oo buug ah waxaa laga dalban karaa:

www.publikasjonsbestilling.no

Guddiga waxaa lagala xiriiri karaa madaxa guddiga Stener Kvinnsland, tlf. 958 90 514